



مؤسسة النور للإرشاد والتنمية

Al-Nur Foundation for Guidance and Development

Profile

Al-Nur Foundation for Guidance & Development

Towards Mature Awareness and Sustainable Development

Profile-ka

Hay'adda Al-Nur ee Hanuuninta iyo Horumarinta

Donation Accounts
koontooyinka Caawinaada

Salam Somali bank: 38476231

E-Dahab: +252622133337

EVCPLUS: +252772333337

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

Hordhac:

Hay'adda Al-Nur ee Hanuuninta iyo Horumarinta waa hay'ad madax-bannaan, ka shaqeyso samafalka, hagiidda iyo horumarinta. Waa hay'ad u shaqeysa si waafaqsan shuruuca dalka, barnaamijyadeeda iyo hawlaheedana waxaa haga mabaadi'da Shareecada Islaamka.

Aasaasidda Mu'asasada:

Mu'asasada Al-Nur waxaa la aasaasay bishii **Dicember 2025**, waxaana aasaasay aqoonyahanno ku kala sugan gudaha iyo dibadda dalka, iyadoo la raacayo hal-ku-dhegga ah "Hanuunin & Harumarin." Ujeeddadeedu waa in la kordhiyo wacyigelinta, hagitaanka, gargaarka & in la gaaro fayoobaanta bulshada iyo horumar waara oo dhammaystiran.

Aragtida Mu'asasada:

In lahelu bulsho miyir qabta, isku xiran, wax soo saar leh oo ku salaysan qiyamka wanaagsan, fikirka dhexdhexaad ah, samafal bulsho, iyo horumar waara.

مؤسسة النور للإرشاد والتنمية

Al-Nur Foundation for Guidance and Development

Farriinta Mu'asasada:

In laga qayb qaato dhismaha shakhsiyadeed iyo kan bulsho, iyada oo loo marayo wacyigelinta, horumarinta garaadka, & barnaamijyada samafalka iyo horumarinta oo kor u qaada qiyamka, xasilloonida nabadda, dib uheshiisiinta iyo taageeridda horumarin bulsho oo dhammaystiran.

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

Qiyamka Mu'asasada:

Qiyamka Mu'asasada Al-nur waa dhex-dhexaadnimo, dheelitirnaan, mas'uuliyad bulsho, hufnaan, daacadnimo, xirfad tayo leh, iskaashi, is-dhexgal iyo ixtiraamka kala duwanaanshaha garaadka bulshada.

Hal-ku-dhegga Mu'asasada:

Hanuunin & Horumarin

Goobaha Ay Ka Howl-gasho Mu'asasada:

Mu'asasada Al-nur waxa ay ka howl-gashaa wadamada Soomaaliya, Itoobiya iyo Kenya.

Ujeeddooyinka Mu'asasada:

1. Faafinta wacyigelinta diinta iyo garaadka oo ku salaysan dhexdhexaadnimo, dheelitirnaan, iyo ka hortagga dhaqamada qalloocan.
2. Xoojinta nidaamka xalaqaadka diiniga ah & Abuurista Masaajidda iyo xarumaha diinta lagu barto.
3. Qabashada tartannada quraanka & diinta iyo xoojinta barashada culuumta quraanka.
4. Ka qayb qaadashada horumarinta awoodda aadanaha iyo dhisidda hoggaanka bulshada, iyo taageeridda dadaallada horumarinnada waara.
5. Awoodsiinta dhallinyarada, qoysaska, iyo hoggaamiyaasha ay bulshada ku tiraantahay, sida culimada, hoggaanka dhaqanka & bulshada rayidka ah, si loo dhiso nabadda, loona xaqiijiyo dib uheshiisiinta iyo ka qayb galka bulshada.

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

6. Sameynta iyo taageeridda xarumaha Waxbarashada iyo caafimaadka.
7. Hirgelinta barnaamijyada gargaarka iyo bani'aadamnimada, si looga jawaabo dhibaatooyinka, loona taageero dadka saboolka ah.
8. Qoditaanka ceelasha biyaha dhaw iyo kuwa biyaha fog.
9. Ka shaqaynta barnaamijyo xilliyeedka, si loo caawiyo kuwa sooman & dadka Ciiddaya.
10. Hirgelinta horumarinta dhaqaalaha, beeraha, xoolaha, iyo kalluumeysiga, si loo taageero bulshada.
11. Sameynta daraasado & cilmi-baarisyo ku saabsan howlaha shaqada ee Mu'asasada Al-nur.
12. Hirgelinta iskaashiga samafalayaasha, hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn ee shaqo wadaagga la ah Mu'asasada.

Shaqada Mu'asasada (Scope of work:)

1. Hagidda Diinta iyo Aqoonta, iyo wacyigelinta bulshada iyo dhaqanka.
2. Barnaamijka Xalaqaadka Diiniga ah.
3. Horumarinta bulshada si loo taageero qoysaska, loo tayeeyo dhalinyarada iyo qaybaha bulshada, loo daryeelo agoonta iyo carmalka, loona dhiirrigeliyo dib-u-habaynta qoyska iyo bulshada.
4. Waxbarashada iyo dib-u-habaynta si loo dhiso loona taageero xarumaha waxbarashada, barnaamijyada akhriska, waxbarashada Islaamka, iyo tababarka xirfadeed.

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

5. Caafimaadka si loo dhiso loona taageero xarumaha caafimaadka iyo xoojinta shaqaalaha caafimaadka iyo qalabka.
6. Gargaarka iyo shaqada samafalka si looga jawaabo masiibooyinka loona taageero dadka saboolka ah iyo kuwa baahan.
7. Qodista ceelasha meelaha baahiyadu kajirto.
8. Horumarinta dhaqaalaha, beeraha, xoolaha, iyo kalluumeysiga, awoodsiinta dhaqaalaha yar yar, tababarka ganacsiga, iyo bixinta amaahda aan dulsaarka lahayn ee wax soo saarayaasha.
9. Horumarinta aadanaha, tababarka, iyo dhisidda awoodda.
10. Dhisidda nabadda iyo isku xirnaanta bulshada.
11. Daweynta fikradaha qalloocan iyo kor u qaadista amniga garaadka.
12. Barnaamijyo xilliyeedka (cuntada afurka, Zakada Fitriga, Udxiyada iyo hadiyadaha Ciidda caruurta).
13. Xoojinta shaqada iskaa wax u qabso iyo dadaallada bulshada.
14. Cilmi-baarista bulshada iyo daraasaadka xiriirka laleh howlaha mu'asasada.

Hababka hirgelinta (means):

1. Koorsooyinka tababarka iyo aqoon-is-weydaarsiyada.
2. Siminaaro iyo shirar.
3. Wacyigelinta iyo ololaha warbaahinta.
4. Cilmi-baarista iyo daraasaadka.

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

5. Iskaashiga samfalayaasha, ururada dowliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn.
6. Qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda hanuuninta, samafalka, iyo horumarinta.
7. Hirgelinta hagitaan ku salaysan barnaamijyada samafalka, horumarinta iyo hindisayaasha bulshada.

Kooxaha bartilmaameedka u ah Al-Nur (Target Groups):

1. Dhalinyarada, ardayda, macallimiinta, iyo wacyigeliyaasha.
2. Culimada, imaamyada iyo hoggaamiyeyaasha diinta,
3. Odayaasha dhaqanka & hoggaamiyeyaasha bulshada.
4. Haweenka iyo qoysaska.
5. Agoonta, carmalka, dadka naafada ah, iyo qoysaska saboolka ah.
6. Ururada bulshada rayidka ah iyo qaybaha kala duwan ee bulshada maxalliga ah.

Xarunta Mu'asasada & Xafiisyada(Headquarters and branches):

- Muqdisho, caasimadda Soomaaliya waa xarunta mu'asasada.
- Mu'asasada waxa ay xafiisyo ka furaneysaa, Itoobiya, Kenya iyo wadamada dibadda.

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com



مؤسسة النور للإرشاد والتنمية
Al-Nur Foundation for Guidance and Development

Qaab-dhismeedka Mu'asasada (Structure):

Qaab-dhismeedka maamulka ee Hay'adda wuxuu ka kooban yahay Sadax

Golo:

1. Golaha Umanada Mu'asasada (Trust Board): Golahan waa golaha ugu sarreyo Mu'asasada waxa uuna yeelanayaa Guddoomiye & xubno, waxa ayna dajinayaan aragtiyada iyo qorshayaasha Mu'asasada.
2. Golaha Maamulka Fulinta Mu'asasada (Executive Board): Golahan wuxuu mas'uul ka yahay hirgelinta qorshayaasha iyo barnaamijyada maamulka iyo fulinta ee mu'asasada. Waxaa uuna yeelanayaa Maamule, sidoo kale wuxuu yeelanayaa xubnaha Golaha Fulinta
3. Golaha Shuurada Mu'asasada (Shura Council): Golahan waxaa ku jirayo xubnaha guud ee Mu'asasada & deeq bixiyaasha, kuwaas oo ka kooban rag iyo dumar, waxaana loo sameyn doonaa laba barkulan oo kala madax bannaan.
4. Golaha Guud ee Mu'asasada (Members Council): Golahan waxaa ku jirayo xubnaha guud ee Mu'asasada & deeq bixiyaasha, kuwaas oo ka kooban rag iyo dumar, waxaana loo sameyn doonaa laba barkulan oo kala madax bannaan taas uu nidaaminayo xeeraka mu'asasada.

Address:


Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

QAAB-DHISMEEDKA MAAMULKA MU'ASASADA

ORGANIZATIONAL STRUCTURE



Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

Contac Us

Telephone: +252772333337

WhatsApp: +252772333337

E-mail: muasasadaalnur@gmail.com

Donation Accounts

koontooyinka Caawinaada

Salam Somali bank: 38476231

E-Dahab: +252622133337

EVCPLUS: +252772333337

Address:

Headquater Mogadishu-Somalia

Telephone: +252772333337 WhatsApp: +252772333337